**Amarka L. 81 rep.**

**Canshuur dhimista soo dejinta mashiinnada loogu talagalay in lagu kordhiyo horumarinta warshadaha iyo beeraha ee Dalka.**

## MAAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## MAAMULAHA

Marka uu arkay xeerka 8 Feberaayo 1950 lamba.12;

Marka uu arkay dekereetada Madaxwynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee taariikhda 31 Maarso 1950;

Marka uu arkay xeerka 6 Jannaayo 1928, lamba. 3425 kaasoo oggolaanaya heshiiska lagu saxiixay Saint- Germain-en-Laye 16 Setember 1919 oo dhexmaray Talyaaniga iyo Dawlado kale, kuna saabsan dib-u-eegidda Axdiga Guud ee Berlin kuna taariikhaysan 26 Febbraayo 1885 ee Axdiga Guud iyo bayaanka Bruxseles ee 2 Luuyo 1890;

Markuu tixgaliyay baahida loo qabo in la dardar geliyo horumarka warshadaynta iyo beeraha Dalka;

## WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Waxaa la bixiyay, muddada u dhexeysa 1 Abril illaa 30 Juun, canshuur dhaafka kastanka iyo xuquuqda tirakoobka ee ku saabsan soo dejinta makiinadaha, qalabka daayactirkooda iyo waxyaabaha dheeraadka la socda, qalabka iyo agabka loogu talagaly in lagu dhiso warshadaha cusub, ama lagu ballaarinayo kuwii horay u jiray, ama loogu talagalay urur-hantieed beereed horay u jirey, ama kuwa cusub ee la dhisayo.

### Qod. 2

Canshuur dhaafka kastanka ee makiinadaha dalka loo soo dhoofinayo, ee lagu sheegay qodobka sare, waxaa oggolaanaya Hoggaanka Adeegyada Kastanka marka ay codsadaan ciddii dan ka leh waxaana shardi looga dhigayaa in la xaqiijiyo meesha dhabta ee ay ku wajahanyihiin iyo waxyaabaha qalabka warshadaha iyo beeraha looga shaqeenayo oo la soo dhoofiyay.

### Qod. 3

Codsiga canshuur dhaafka waa in ay la socotaa caddayn uu soo saaray xaafiiska Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya (A.F.I.S), iqtisaaska ku leh, oo lagu sheegayo in daneeyaha uu ku hawlanyahay hawlo warshadayn ama kuwa beero ee uu u doonayo camshuur dhaafka kastanka, waana inay la socdaan tilmaamaaha lambarada soo socda:

1) Magaca Ganacsadaha wax codsaday, halka uu degganyahay iyo nooca warshadda ama beerta iyo meesha qalabkaas looga shaqeynayo, iyadoo la caddeynayo haddii ay yihiin qalab cusub oo la rakibayo ama lagu ballaarinayo Shirkad warshadeed ama mid beereed ee horay u jiray;
2) Dalka asal ahaan laga keenay iyo, suurtagalnimada meesha laga soo sameeyay qalabka la soo dhoofiyay ee canshuur dhaafka, noocayadooda gaarka, miisaanka iyo qiimahooda, iyadoo lagu soo lifaaqayo haddii uu waxtar u yahay aqoonsiga qalabka xagga kastanka, liiska cadadka iyo xirmooyinka, oo ay la socdaan astaamaha iyo lambarada, iyo sidoo kale sawirada makiinadaha iyo hannanka warshadeed;

3) Xudduudka ay gaarsiisantahay oggolaashaha canshuur dhaafka uu bixiyay Xaafiiska u qabilsan A.F.I.S, haddii oggolaashahaas looga baahdo;
4) Dammaanadda Ganacsadaha wax codsaday uu u doonayo in uu ku bixiyo xuquuqda waajibka kastanka, marka qalabka la soo dhoofiyay sidii la rabay aan loo canshuuri karin;
5) Caddayn waadaxa oo ku saabsan in uu garanayo iyo aqbalayo dhammaan waajibaadka iyo shuruudaha uu sheegayo Amarkaan;
6) Kastanka uu doonayo in uu ka soo dejiyo qalabka la cayimay.

**Qod. 4**

Marka la oggolaado canshuur-dhafka shuruudaha wata, Hoggaanka adeegyada Kastamada wuxuu wargeiinayaa Ganacsadaha wax soo codsaday. Isla wargalintaaso kale waxaa la siinayaa Kastanka hawlaha soo-dejinta u xilsaaran, iyadoo liista laga samaynayo mid kasta oo gaara qalabka canshuurta laga dhaafay iyo isago oggolanaya in uu sameeyo biil ama bolleto waajibka looga joojinayo, marka la keeno curaarta xuquuqdi waajibka kastanka ee saarnayd qalabka canshuurta laga dhaafayo, ama la qaadayo dammaanad kale oo u qalanta.

**Qod. 5**

Marka la soo dejinayo, Ganacsadaha daneynaya, waa in uu keenaa kastanka, nooca, caddaynta qalabka waajibka laga joojinayo, isagoo qeexaya si waafaqsan oggolaashaha la siiyay, lana xusayo waxyaabaha ku gadaaman.

Kastanku wuxuu ku dhaqaaqayaa hubinta qalabka Ganacsdaha wax la siiyay wuxuuna soo saarayaa biilka waajibaadka looga dhaafay si waafaqsan natiijada muuqata, isgoo si cad oo gaara ahaaneed u tilmaamaya makiinadda, qalablka daayactirka, waxyaabaha dheeraadka ee la socda, qalabka iyo agabka loo oggolyay in loo isticmaalo. Wuxu kaloo ku dhaqaaqayaa xaq-gudidda waajibaadka lagu qaadayo dammaanadda, (curaarta ama ballan-qaadka) iyo in lag uruuriyo xuquuqda dheeraadka la socda biilka gaarkaa ah Mod. A 22.

**Qod. 6**

Qalabka dhoofinta lagu keenay ee canshuur-dhaafka waa looga shaqeeyaa urur-hantiyeedka lagu sheegay oggolaashaha canshuur-dhaafka shardiga leh, sanad gudahiis oo ka soo billaabata taariikhda la sameeyay biilka/bolleetada kastanka. Muddadaas waxaa lagu kordhi kara sanad kale marka Xaafiiska A.F.I.S. ee shaqada ku leh uu ga'aamiyo, marka la helo arji sababaysan ee Ganacsadaha daneynaya. Muddooyinka la soo sheegay dhexdooda isla Ganacsadahu waxaa ku waajiba in uu weydiisto Kastanka in uu gutay hawlgalladii, xaqiijinta tirada ka shaqeysa urur-hantiyeedka loogu talagalay, qalabka dhoofka lagu keenay ee canshuur-dhaafka iyo in kastanka la keeno isla biilka/bolletada farca (figlia) waajibka la joojjiyay. Marka ay dhammaato muddada sanadka biilka/bolleetada wax soo dejinta waajibka la joojiyay, oo Ganacsaduhu aanu weydiisan xaqiijinta la soo sheegay, Kastanku wuxuu bilaabayaa in soo xareeyo lacagtii curaartii ee damiinka ahayd, isagoo goynaya xaafis ahaan biilka/bolletada uruurrinta taaso lagu dul qorayo faraca rasiidka biilka/bolletada waajibka lagu joojiyay, si loo dhamaystiro ka saaridda. Sidaaso kale kastanku wuxuu samaynayaa haddii uruurintu laga saaro dammanadda.

**Qod. 7**

Muranka ku saabsan makiinadda, qalabka daayactirka, dheeraadka la socda, qalabka iyo agabka in sidii loogu talagalay loo hawlagaliyay, caadiyan waxaa qabanaya Kastanka

hawlgallada soo dhoofinta qabtay, isagoo samaynayaa baaris lagu qabanayo goobtii uu weydistay daneeyuhu, iyo xitaa haddii uu isagu iskiis u codsado, iyadoo kharaska uu qabo Ganacsadaha wax la siiyay. Kastanka, gaar ahaan marka urur-hantiedka warshadda iyo beeraha uu aad uga fag yahay Xaafiisyada Kastamada, wuxuu iqtiyaar u leehay in uu la xariiro Masuulinta goobta uu ku yaallo urur-hantiyeedka isaga, haddii ay samayn karaan barista loo baahanyahay, iyagoo qabanaya xitaa hawlaha kale ee xaafiisyada shaqada ku leh ee maxalliga, marka loo baahdo aqoonta farsamooyin gaara ee la xariirta aqoonsiga makiinadda iyo qalaba badan ee la falgala Baaristaan, ha laga sameeyo Kastanka ama Hay'ad kale ee la soo wakiishay waa in lagu muujiyaa maxdar/qoraaal-doodeed gaara, iyadoo Kastanku uu dib u ceshan doono farac biilka/bolletada waajibka lagu joojiyay, isagoo bixinaya biilka/bolletada dhoofinta canshuur-dhaafka looga saarayo.

Wuxuu kaloo ku dhaqaaqayaa, in uu soo bandhigo biilka/bolletada curaarta, marka iyaga la soo celinayo ama laga saarayo dammaanadda.

**Qod. 8**

Marka qalabka la soo dhoofiyay loo helo canshuur-dhaafka ugu dambeeya oo la celinayo lacagta curaarta ama laga saarayo dammaanadda kale, Ganacsadaha wax la siiyay ma siin karo qalabka isaga ah kutalagal ka duwan midka lagu caddeeyay iyo lagu xaqiijiyay qaababka lagu sheegay qodobada Amarkaan, lagamana qaadi karo urur-hantiyeed loogu talagalay, iyadoo aan Kastanka loo soo sheegin, markaaso la bixinayo xuquudi Kastanka ee la xiriira, haddii aan la muujin in qalabku uu yahay mid aan waxba lagu qaban larin, ama Masuulinta A.F.I.S. aanu ka helin cusboonaysiinta canshuur-dhaafka.

**Qod. 9**

Markasta oo la jabiyo qodobka la soo sheegay waxaa loo qaadanaya mid la mida dambiyada tahriibka alaabada (kontrobaan).

**Qod. 10**

Qalaabta dhoofka lagu keenay ee canshuurta laga dhaafay, oo si toosa aanu u keenin urur-hantiyeedka danta ka leh, hasayeeshe ay keeneen wakiillo ka socda warshadda soo saartay, ama ganacsatada wax soo dejiya, waxaa loo ggolaanayaa fulin shuruud leh iyagoo ballan qaadaya in ay ku yimaadaan lix bilood gudahood oo ka bilaabada maalinta biilka/bolleetada kastanka waajibka looga joojiyay, arjiga saxda ee canshuur-dhaafka oo ay soo saxiixaan kuwa xuquuqda ku leh iyo iyadoo la dhowrayo dhammaan hababka ku qoran qodobka 3 ee xagga sare lagu soo sheegay. Muddada la soo sheegay waa mid la kordhin karo, marka Ganacsadaha wax soo dejinayaa uu u soo gudbiyo codsi sababysan Xaafiiska shaqada ku leh ee A.F.I.S., ugu badnaan muddo ah saddex bilood.

Marka ay dhammaato muddadaas, oo Ganacsadaha was soo dejiyay aanu helin ballanqaadka ku qoran faqradda sare, Kastanku wuxuu ku dhqaaqayaa uruurinta waajibka.

Muqdisho, 12 Nofember 1950.

Maamulaha

**Gorini**